

UJEEDDO:-CADDEYN QIRAAL GOOB JOOG DARDAARAN.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **28/01/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, waxaa nootaayada horteeda yimid Kulmia Abdullahi Mohamed Asagoo raali ah Cid ku qasabtay Cadeyntaan bixinteedana aysan Jirin Wuxuuna Nootaayada Ka Hor Cadeeyey Sidatan Soo Socota:-

Aniga oo ah **KULMIA ABDULLAHI MOHAMED, Somali ah, ku dhashay Isiolo 01/07/1981-dii, Leh Kenyan Passport No.BK087724,** Kana Mid ah Dhaxaltooyada Marxuum **Abdullahi Haji Mohamed** Waxaan Qoraalkaan Ku Cadeynayaa aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka Fiyoow, Taam ah Cid I qasabtayna aysan Jirin, in alle ha u naxariistee **Aabe Cabdullahi Haji Mohamed** ka hor Inta uusan Geeriyoon uu shir ku qabtay Gobolka Bari, Gaar ahaan degmada **Rako Raaxo**, qiyaastii sanad ka hor, Shirku waxa uu ku saabsanaa dacwad ka timid Walaalkey **Muuse Abdullahi Mohamed** oo dacweeyay **Bashir Abdullahi Mohamed** oo isna nala dhashay, dacwadaas oo aheyd mid Labadooda Ka Dhaxeysay khuseysayna Arrimo gaar ah, Markii dacwadaas iyo khilaafkaas lagaba gabeeyay ayuu **Muuse C/llaahi Xaaji maxamed** iyo intii joogtay goobtaas oo ah **Ilma Cabdullahi Xaaji Maxamed** ay Aabe weydiyeen in ay jirto Wax Xoolo iyo Xuquuq uu Adeerkeen **Ismail Haji Mohamed (Siibed)** uu u haayo Aabo **Abdullahi Haji Mohamed**, Wuxuuna Aabe Ka Hor Cadeeyay reerka oo idil Hortooda Yirina sidatan “haddii aan Caawa dhinto Ma jirto xoolo aan ku leeyahay Ismail Haji Mohamed (Siibed), cid wax ku lehna oo Reer C/llaahi aysan jirin, Haddii uu adeerkiin Ismail Haji Mohamed (Siibed) Wax hanti ah uu idiin keeno ka qaata”, Wuxuuna Aabe intii goobtaas fadhinay ku dardaarmay oo aan goob-joog u ahay allane uu igu ogyahay Qodobadaan Soo Socda:-



1. In ilma **Abdullahi Haji Mohamed** aysan ilma **Ismail Haji Mohamed (Siibed)** ku laheyn wax hanti ah oo aabo ka tegay mood iyo nool.
2. in ilma **Abdullahi haji Mohamed** ay dhaxladaan geeridiisa Ka dib hanti ay ka mid aheed gaarigii Sabaaxa ahaa taargadiisu ahayd 60172I, baabuurki N3 oo buluugga ahaa iyo ari aan ka soo saaray xerada hooyaday Faaduma Faarax.

Hadaba waxaan halkaan ka qirayaa In aysan jirin wax hanti iyo xoolo aan ku leenahay ama noogu haray ilma Ismail haji Mohamed(Siibad) sida waafaqsan dardaarankii Aabaheyn Marxuum Abdullahi Haji Mohamed oo aan anigu Goob jooge ka ahaay, sidaas darteed waxaan halkaan ka cadeeynayaa in aysan jiri doonin wax xaquuq ah ama hanti ah oo aniga dhankeyga ku sheegan doono Reer Ismail Haji Mohamed(Siibad).



SAXIIXA CADEEYAHA

1- KULMIA ABDULLAHI MOHAMED

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1-ISMAIL WARIO MOLLU

2- ABDINOOR HASSAN









(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1373/T.P.N/25, Tr. 28/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- KULMIA ABDULLAHI MOHAMED Ahna (Cadeeye) iyo Markhaatiyaasha**, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Cadeeyntaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By:C/qani



NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA


Tr. 20/10/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Kulmiye C/laahi Maxamed** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **D Dukumiintiga Original** Caddeynta **Rep No. 1373/T.P.N/25, Tr. 28/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Kulmiye C//laahi Maxamed
Taariikhda Caddeynta	28/01/2025

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **Kulmiye C/laahi Maxamed** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **D**.

FG:- Cadeyntaan Waxaa Loo Celiyay Origalkiisa Xafiiska Nairobi



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Kulmiye C/laahi Maxamed